



Tallaalka COVID-19 iyo Adiga

Su'aalaha Badanka la Iswaydiiyo ee loogu talagalay dadka la nool HIV ee Oregon

Qaybta HIV/STD/TB ee Maamulka Caafimaadka Oregon waxay aqoonsan tahay in hay'adaha caafimaadka, caafimaadka dadwaynaha iyo dawliga ahi ayna sida badan ku dadaalin inay noqdaan qaar lagu kalsoonaan karo marka la eego daryeelidda dadka la nool HIV; bulshooyinka Madow, Latinx iyo kuwa Waddanka loogu Yimi; iyo dadka lagu sheego khaniisiinta rag iyo dumarba, ninaw-naagga ama dadka aan dhinacba raacsanayn. Isla markaas, hay'adahan laftoodu waxay ku dhiirigalinayaan tallaalka COVID-19 bulshooyinka taariikh ahaan laga sadbursaday. Waxaanu qiraynaa in qaar badan oo kamid ah bulshooyinka aanu u adeegno, inaanu ka codsanayno inayna su'aal ka keenin aqbalidda tallaalkan cusub. Qaybta HIV/STD/TB waxay heegan u tahay inay hawshaasi kula gasho. Waxaanu rajaynaynaa dokumentigani inuu ka caawin doono dadka la nool HIV inay ka qaataan go'aan xogogaal ah talaalka COVID-19. Markasta oo dad badan ay doortaan in la tallaalo, waa markasta oo aynu dhammaanteen ka badbaadno COVID-19 iyo markasta oo aynu dib ugu noqono noloshii wada joogidda.

Ogow in hyperlink-yada dokumentigu ay ku gayn doonaan illo kale oo macluumaad oo faahfaahin ka bixinaya natiijooyinka tijaabada tallaalka COVID-19, warbaahinta kala duwan si loo sharraxo sida tallaalku u shaqeeyo iyo khayraad OHA oo kale.

S1: Waa maxay tallaalka COVID-19 ee la oggolaaday in Maraykanka laga isticmaalo?

J1: Taariikhdu markay ahayd Diisambar 11, 2020, Drug Administration (FDA) (Maamulka Cuntada iyo Daawadu) wuxuu bixiyey Oggolaanshihiisa Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah ee koowaad ee tallaalka COVID-19 ee dadka da'doodu tahay 16 iyo wixii ka wayn tallaalkaasi oo ay sameeyeen Pfizer iyo shirkadda reer Jarmal ee BioNTech. FDA waxay siisay Oggolaanshaheegii labaad (EUA) taariikhdu markay ahayd Diisambar 17, 2020 tallaalkii hore mid la mid ah oo loogu talagalay dadka ah 18 iyo wixii ka wayn tallaalkaasi oo ay samaysay Moderna. In kastoo EUA (Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah) ayna ka dhignayn oggolaansho buuxa, tallaalka COVID-19 waxaa lagu tijaabiyay tobanaan kun oo kaqeybgelayaal daraasad ah, taasoo soo saartay xog ku filan oo lagu qanciyo FDA inuu tallaalku yahay mid ammaan ah oo wax-ku-ool ah, soo-saarayaasha soosaarayna ay buuxiyeen dhammaan heerarka badqab.

S2: Sidee ayey tallaalada COVID-19 ee Pfizer/BioNTech iyo Moderna u shaqeeyaan?

J2: Labada tallaalba waxay ka kooban tilmaamo dhawr ah, oo la dhaho Messenger RNA (mRNA marka la soo gaabiyo), kuwaasi oo bara unugyada sida loo sameeyo borotiino. mRNA-gan waxa ku dahaaran moliyuulo yaryar oo baruur ama dux ah. Markii lagu duro/mudo muruqa garabka, unugyadeenu waxay isticmaalaan mRNA-ga kujira gudaha tallaalka si ay ugu sameeyaan mid kamid ah borotiinada oogada COVID-19. Borotiinkani wuxuu sababaa jawaab difaac taasi oo innaga ilaalisa caabuqa. Markii uu unuggu isticmaalo, mRNA-ga waa la burburiyaa, mana noqdo qayb kamid ah, ama baddalaysa DNA-geena, unugyadeena ama jirarkeena.

Fiidyawyo kaa caawinaya inaad wax badan ka ogaato sida tallaalada COVID-19 ee Pfizer/BioNTech iyo Moderna u shaqeeyaan waxaad ka heli kartaa [halkan](#) iyo [halkan](#), siday isugu xigaan. In kastoo qaar badan oo inaga mid ah ay maqlayaan teknoolojiyaddan tallaalka mRNA markii koowaad, waxa si baaxad leh baaritaan loogu waday muddo tobanaan sano ah. Xaqiiqdii, wixii aynu ka baranay sanado badan oo badan cilmibaarista HIV ayaa suurtagalisay in tallaaladan la sameeyo.

Labada tallaalba waxay u baahan yihiin laba jeer in qofka la mudo. Qiyaasta labaad ee tallaalka Pfizer waa in la qaataa 21 maalmood kadib qiyaasta koowaad, qiyaasta labaad ee tallaalka Moderna waa in la qaataa 28 maalmood kadib qiyaasta koowaad.

S3: Waa sidee waxtarka tallaalada COVID-19 ee Pfizer/BioNTech iyo Moderna?

J3: Marka la eego [tijaabo lagu sameeyey](#) ka badan 40,000 oo kaqaybqaate, tallaalka Pfizer/BioNTech wuxuu ka hortagay 95% kiisaska COVID-19 ee astaamaha leh. Tallaalku si isku mid ah ayuu wax ugu taray dadka oo dhan. Ugu dhawaan saddex-meelood hal-meel kaqaybqaatayaashu waxay ahaayeen Hisbaanik/Latinx, 10% waxay ahaayeen Madow iyo 4% waxay ahaayeen Aasiyaan. Guud ahaan 121 qof oo la nool HIV ayaa kaqaybqaatay tijaabada Pfizer/BioNTech.

Marka la eego [tijaabo lagu sameeyey](#) ka badan 30,000 oo kaqaybqaate, tallaalka Moderna wuxuu ka hortagay 94% kiisaska COVID-19 ee astaamaha leh iyo 100% kiisaska COVID-19 ee daran. Shan-meelood hal-meel kaqaybqaatayaasha daraasaddu waxay ahaayeen Hisbaanik/Latinx, 10% waxay ahaayeen Madow iyo 4% waxay ahaayeen Aasiyaan. Marka la eego dadka da'doodu tahay 65 iyo ka wayn, tallaalka waxtarkiisu in yar ayuu hooseeyey, wuxuuna badbaadinayey 86% kiisaska COVID-19. Guud ahaan 176 qof oo la nool HIV ayaa kaqaybqaatay tijaabada Moderna. Marka la eego dadka la nool HIV, ma jirto cid tallaalka qaadatay oo qaaday COVID-19, halka hal qof oo aan qaadan tallaalku uu qaaday cudurka COVID-19.

S4: Ka waran badbaadada?

J4:

- Bukaanada intooda badan waxay dareemaan xanuun fudud ilaa mid dhexe halka garabka ah ee laga muday.
- Daal, madax-xanuun, qarqaryo iyo kala-goosyada iyo murqaha oo qofka xanuunaa waa caadi, laakiin waxay jiraan wax aan ka badnayn laba maalmood kadib marka qofka la mudo. Ma aha wax aan caadi ahayn inaad dareento astaamahaan kadib marka lagu tallaalo, waxayna caadi ahaan muujinayaan in nidaamkeena difaacu uu samaysanayso difaac.
- Dadka taariikh ahaan leh xasaasiyado daran waxay dareemi karaan xasaasiyad kadib tallaalka Pfizer/BioNTech. Dadka hore xasaasiyad uga qaaday tallaalada ama daawooyinka la isku mudo wali way qaadan karaan tallaalka, laakiin waa inay kala hadlaan halisaha xirfadlayaashooda caafimaadka waana in laga war hayo kadib tallaalka. Dadka xasaasiyad ka qaada wax kamid ah waxyaalaha tallaalka Pfizer/BioNTech ka kooban yahay waa inayna qaadan tallaalkaasi.
- Tallaalku lama falgalo dabiibyada dheecaanada sugidda jinsiga (gender-affirming hormone therapies) waxayna u dhawdahay inaanu dhib u keenayn dadka daawooyinkan qaata.

S5: Maxaynu sugaynaa inaynu ka barano tallaalka COVID-19?

J5: In kastoo tijaabooyinka tallaalku ay aad u baaxad waynaayeen lagana jawaabay su'aalaha muhiimka ah ee kusaabsan waxtarka tallaalka, wali waxa jira wax badan oo ay tahay in laga barto.

- Kaliya tiro yar oo dad ah oo la nool HIV ayaa lagu daray tijaabooyinka. Xog dheeraad ah ayaa loo baahan taasi oo kusaabsan sida tallaalada COVID-19 ay ku yihiin dadka la nool HIV.
- Ma garanayno muddada difaaca tallaalka COVID-19 ay jirayo kadib tallaalka.
- Ma garanayno haddii tallaalku ka hortago caabuqa bilaa astaamaha ah iyo gudbinta COVID-19.
 - Ilaa taasi ka suurto galayso, sii wad inaad xirato afsaab, mar kasta gacmahaaga maydh, had iyo jeer dadka ka fogow, hawlaha bannaanka ka dooro kuwa gudaha oo raac talooyinka caafimaadka dadwaynaha ee degmada iyo gobolka xataa kadib marka lagu tallaalo.
- Daraasado kusaabsan sida tallaalku u shaqeeyo dhallinyarta yaryar iyo carruurta wali waa socdaan.
- Daraasado kusaabsan sida tallaalku u shaqeeyo haweenka uurka leh iyo kuwa naaska nuujinaya wali waa socdaan sidoo kale.
 - Wakhtigan, [American College of Gynecology and Obstetrics](#) wuxuu sheegay in tallaalka ay tahay inaan laga dayn haweenka uurka leh, naaska nuujinaya ama kuwa laga yaabo inay uur qaadaan.

S6: Miyey tahay in dadka la nool HIV ay qaataan tallaalka COVID-19?

J6: [Xogtu](#) waxay tilmaamaysaa in dadka la nool HIV ay halis badan ugu jiraan in isbitaal loo dhigo una dhiman karaan COVID-19 marka loo eego dadka aan qabin HIV. Tallaalada isticmaala mRNA waxay u dhaw yihiin inayna waxba yeelan dadka la nool HIV maadaama aanu kujirin fayraska dhabta ah oo nooli. Waxaanu ku talinaynaa inay tallaalka COVID-19 qaataan dhammaan dadka la nool HIV iyo in dadka la nool HIV iyo dadka da'doodu tahay 65 jir ama ka wayn iyo dadka leh xaalado caafimaad darro oo hore in mudnaanta koowaad la siiyo tallaalka COVID-19.

S7: Miyaan tallaalka ka qaadi doonaa COVID-19?

J7: Tallaalku keeni maayo COVID-19. Tallaalka waxa kujira kaliya tilmaamaha samaynta qurub yar oo fayraska COVID-19 ah; kuma jiraan tilmaamaha loogu talagalay dhammaan qurubyada kale ee loogu baahan yahay si uu u keeno caabuq. Sidoo kale, qufac, neefta oo qofka qabata, duuf, cune-xanuun, dhadhanka ama urta oo qofka ka tagta – dhammaan calaamadaha COVID – ma keeno tallaalku.

S8: Ka waran hadaan horay u qaaday COVID-19, wali ma qaadan karaa tallaalka?

S8: Dadka horay u qaaday COVID-19 waxay, oo ay tahay, inay wali qaataan tallaalka COVID-19. Haddii aad ka soo bogsanayso COVID-19, sug ilaa muddadaada is-go'doomintu ay dhammaato si aad u qaadato tallaalka.

S9: Ma qaadan karaa tallaalkayga hargabka isla waqtiga tallaalkayga COVID-19?

J9: Keliya si aad ammaan u ahaato, CDC waxay kugula talineysaa inaad sugto laba toddobaad kadib markaad qaadatay tallaalko kale kahor intaadan qaadan tallaalka COVID-19. Markaad qaadato tallaalkaaga COVID-19, waa inaad sugtaa laba toddobaad kahor intaadan tallaalko kale qaadan. Maadaama dad badan aysan awoodi doonin inay isla markiiba qaataan tallaalka COVID-19, hadda waa xilli ku habboon in la qaato tallaalko kale oo laga yaabo in waqtigooda la joogo, sida tallaalka hargabka, tallaalka teetanada ama tallaalka dildillaaca maqaarka.

S10: Waxaan maqlay in tallaalka COVID-19 uu keenayo in dadka laga helo HIV.

J10: Australia, tallaalka waxa la soosaaray iyadoo la adeegsanayo borotiin HIV ah. In kastoo tallaalku aanu keenayn caabuqa HIV, wuxuu keenay in dadka qaatay tallaalka laga helo HIV shaybaarka. Australia waa joojisay tijaabinta tallaalkan.

S11: Waxaan sidoo kale maqlay in noocyada tallaalka COVID-19 qaarkii uu dadka halis u galinayo inay qaadaan HIV.

J11: Sanad kahor, waxa jiray laba tijaabo oo tallaalka HIV ah. Halkii isticmaalka qaybo baruur ah oo yar si loo caawiyo in tilmaamaha unugyada la gaarsiyo (sida tallaalko mRNA), cilmibaarayaashu waxay isticmaaleen dahaarka sare ee fayraska kale oo loo yaqaan "adenovirus type 5." Waxa jira noocyo badan oo ah adenoviruses, sida badanna waxay keenaan duriyada iyo jeermisyada caloosha. Tani waxay ka dhigan tahay in ragga hore u qaaday caabuqa adenovirus 5 ee

qaatay tallaalka ay aad u suurtoagal ahayd inay qaadaan HIV marka loo eego kuwa aan hore u qaadin caabuqa adenovirus 5.

Waxa jira walaac in tallaalka COVID-19 ee isticmaala dahaarka adenovirus 5 uu kordhin karo halista caabuqa HIV. Wakhtigan, tallaalada COVID-19 ee isticmaala dahaarka adenovirus 5 waxa kaliya laga isticmaalaa Shiinaha iyo Ruushka. Ma jiraan shirkado kale oo baaritaan ku wada tallaalada leh dahaarada adenovirus 5.

S12: Goorma ayaan rajayn karaa inaan qaato tallaalka?

J12: In kastoo qiyaasaha koowaad ee tallaalada Pfizer/BioNTech iyo Moderna ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka caafimaadka ay yimaadeen Oregon, qaadashada tallaalka COVID-19 wali inteen badan bilo ayaa inoo harsan. Qorshaha hormooyinka tallaalka ee Oregon waxa laga heli karaa [halkan](#). Ilaa dadka intooda badan la tallaalo, waxaynu u baahannahay sii wadidda xirashada afsaabada, maydhista gacmaheena, ka doorashada hawlaha dibadda kuwa gudaha, ka fogaanshaha dadka kale iyo raacidda talooyinka caafimaadka dadwaynaha ee degmada iyo gobolka si aynu u badbaadino bulshadeena.

Si aad u hesho macluumaadkii u dambeeyey ee hormooyinka tallaalka, waxaad sidoo kale la socon kartaa Badhasaab Kate Brown iyo Maamulka Caafimaadka Oregon bogagga ay ku leeyihiin Facebook iyo Twitter (@OregonGovBrown and @OHAOregon). Taas baddalkeeda, waxaad rukuman kartaa [warsidaha Wacaasha Koronafayras](#) ee OHA ee maalilnaha ah.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](https://www.dhsosha.state.or.us/COVID19.LanguageAccess).